



Sagor för barn på svenska

berattelser.se

Aargoosigii shimbir-malabka / Honungsguidens hämd

Skreven av: Zulu folktale

Illustrerad av: Wiehan de Jager

Översatt av: Anwar Mohamed Dirie (so), Lena

Normén-Younger (sv)

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.


Detta verk är licensierat under en Creative Commons

[Erkännande 3.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv)

<https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv>

Aargoosigii shimbir-malabka

Honungsguidens hämd



Zulu folktale

Wiehan de Jager

Anwar Mohamed Dirie

somaliska / svenska

|| nivå 4





Tani waa sheekada Ngede, shimbir-malabka, iyo nin yar oo dhuuni ah laguna magacaabay Gingile. Maalin goor uu Gingile ugaarsi tagay maqlay ci'da Ngede. Gingile afkiisa ayaa bilaabay in uu dhareero niyeysiga malab dartii. Wuu istaagay wuu na dhagaystay si taxadar ah, oo uu raadiyay ilaa uu arkay shimbirkii oo laamaha korka madaxiisa ku jiro. "Jiiq-jiiq-jiiq," ayuu ku shanqaray shimbiarki yaraa, isaga oo u duulay geedka ku xigo, hadana kan kale. "jiiq-jiiq-jiiq," ayuu ku ciyay, istaagayana marba mar si uu u hubsado in uu Gingile soo raacay.

...

Det här är historien om Ngede, honungsguiden, och en girig ung man som hette Gingile. En dag medan Gingile var ute och jagade hörde han Ngedes läte. Det började vattnas i Gingiles mun när han tänkte på honung. Han stannade och lyssnade noga och sökte tills han såg fågeln högt bland grenarna ovanför honom. "Schitik-schitik-schitik", kvittrade den lilla fågeln medan han flög till nästa träd och sedan nästa igen. "Schitik-schitik-schitik", ropade han, medan han stannade upp då och då, för att vara säker på att Gingile följde efter honom.



Saacad barkeed ka dib, waxa ay soo gaareen geed berde duur baaxad le. Ngede waxa uu si waalli ah ugu boodbooday laamihii geedka. Dabadeedna waxa uu dul dagay mid ka mid ah laamihii, waxa uu na madaxiisa ku soo leexiyay Gingile sidii in la dhahayo, "Waa kan! Kaalay hada! Maxaa waqtigaas dheer u qaadaneynsaa?" Gingile kama usan arki karayn wax shinni ah geedka hoostiisa, laakiin waxa uu aaminay Ngede.

...


Efter en halvtimme kom de fram till ett stort vitt fikonträäd. Ngede hoppade exalterat runt bland grenarna. Han satte sig sedan på en gren och lade huvudet på sned som för att säga: "Här är det! Varför tar det så lång tid för dig att komma hit?" Gingile kunde inte se några bin under trädet men han litade på Ngede.



Gingile waxa uu warrankii ugaarsiga dhigtay geedka hoostiisa, waxa uu soo aruursaday xaabo, dab ayuuna shiday. Markii uu dabkii si fiican u shidmay, qori dheer oo qallalan ayuu dabkii galiyay. Qorigani waxuu khaasatan caan ku ahaa in uu sameeyo qiiq badan marka la shido. Waxa uu bilaabay fuullidii, isaga oo ilkaha ku haya dhanka qaboow ee qoriga qiiqaya.

...

Så Gingile lade ner sitt jaktspjut under trädet, samlade ihop några torra kvistar och gjorde en liten brasa. När elden brann väl stack han en lång pinne i mitten av brasan. Den här typen av ved var speciellt känd för att skapa mycket rök medan den brann. Han började klättra samtidigt som han höll den kalla änden av pinnen mellan sina tänder.



Markiiba waxa uu maqlii karay "sss-sss" da dheer ee
shinnida mashquulsan. Waxa ay ka galeysey kana soo
baxaysay shinniddu meel dulleesha oo geedka jirriddiiisa
ah - hoygeeda. Markii uu Gingile gaaray hoygii shinnida
waxa uu qorigi qiiqayay ku riixay meeshii duleeshay.
Shinnidii banaanka ayay u yaacday, sababtoo ah ma
jeclayn qiiqa - laakin intaa ka hor waxay Gingile siiyeen
xooqaa qaniinyo kululi

...

Snart kunde han höra det högljudda surrandet av
arbetande bin. De flög in och ut ur en hållighet i
trädstammen. När Gingile kom fram till binas bo stack han
in den rykande änden av pinnen i hålet. Bina kom snabbt
flygande ut, arga och elaka. De flög iväg eftersom de inte
gillar rök, men inte förrän de hade givit Gingile några
smärtsamma sticki!



Sidaa darteed, marki! Gingile ay carruurtiisa maqlaan
sheekada Ngede waxa ay ixtiraam u qaadaan shimbirka
yar. Mar walba oo ay malab soo gurtaan, waxa ay
xaqiijiyaan in ay geybta ugu weyn xabad barsheedka uga
tagaan shimbir malabka!

...

Och på det sättet kom det sig att Gingiles barn känner stor
respekt för den lilla fågeln Ngede när de hör historien om
honom. När de skördar honung lämnar de numera alltid
den största kakan till honungsguiden!



Markii ay shinnidii tagtay, Gingile waxa uu gacantiisa ku riixay buulki malabku ku jiray. Waxa uu kala soo baxay gacan buuxdo xabag-barsheed, tiftifqayso malab iyo diirdiir cadcad oo buudhan. Waxa uu si taxaddar leh ugu riday xabag-barsheedkii kiish uu garabka ku sitay, geedkiina waa uu ka soo degay.

...


När bina var borta tryckte Gingile in sina händer i boet. Han tog ut fulla nävar av tung honungskaka, som droppade av rik honung och som var full av feta, vita larver. Han lade ner honungskakan i sin säck som han bar över axeln och började att klättra ner för trädet.



Intii ay haramcaddu weerarin Gingile, si degdeg ayuu hoos uga degay geedki. Degdeggi awgii ayuu laan gafay, waxa uu si shanqar culus leh ugu dhacay dhulka oo wareejiyay canqowgiisi. Sidii ugu dhakhsaha badneyd ee uu karay ayuu u dhutiyay. Nasiib lahaayaa, haramcaddu aad bay weli u sii hurdeysnayd haday cayrsan lahayd. Ngede, Shimbir-malabkii, wuu helay aargoosigi. Gingile na cashar ayuu bartay.

...


Innan leoparden kunde svinga sina klor mot Gingile klättrade han snabbt ner från trädet. I brådskan missade han en gren, landade med ett stort brak på marken och stukade sin fot. Han haltade iväg så fort han kunde. Som tur var för honom var leoparden fortfarande för sömnig för att jaga honom. Honungsguiden hade fått sin hämnd. Och Gingile hade fått sig en läxa.



Ngede waxa uu si xiiso leh u daawanayay wax walba oo uu Gingile sameynayey. Waxa uu sugayay in uu uga tago cad xabag-barsheed buurran ah Shimbir-malabka si mahad celin ah. Ngede laanba laan ayuu uga duulay, ugu na sii dhawaaanayay dhuulka. Ugu dambeyn Gingile geedka salkiisi ayuu gaadhay. Ngede dhagax u dhow wiilka ayuu dul istaagay waxuu na suggay abaalmarintiisii.

...

Ngede tittade på allt som Gingile gjorde. Han förväntade sig att Gingile skulle ge honom en stor bit med honungskaka som tack till honungsguiden. Ngede fög från gren till gren, närmare och närmare marken. Till slut kom Gingile ner på marken. Ngede satte sig på en sten nära pojken och väntade på sin belöning.



Gingile wuu fuulay, la yaabbanaa sababta uu u maqii waayay "Sss-sss-sss" di caadiga ahayd. "Malaha godku gudaha geedka ayuu sii jiraa," ayuu ku fikiray. Laan kale ayuu kor usii fuulay. Laakiin halkii godkii shinnida eegii lahaa, waxa uu indhaha ku dhuftay haramcadi Haramcaddu aad bay uga carootay in hurdadeedi! si edeb darro ah looga dhexgalay. Indhaha ayay isku ku duudday, afkeedana way kala qaadday iyada oo ilkheeda waaweyn ee afka badan dibadda u soo saaraysa.

...

Gingile kättrade men undrade varför han inte hörde det sedvanliga surrandet. Kanske bina finns djupt inne i trädet, tänkte han för sig själv. Han drog sig upp till en annan gren. Men istället för ett bo med bin stirrade han rakt in i ögonen på en leopard! Leoparden blev mycket arg över att ha fått sin sömn avbruten på ett så oartigt sätt. Hennes ögon smalnade och hon öppnade sitt gap för att visa sina mycket stora och mycket skarpa tänder.



Laakiin, Gingile dabkii ayuu damiyey, warrankiisii na qaatay oo socodkii gurigiisa billaabay, isaga oo inkiraya shimbirki. Ngede si carro leh ayuu u ciyey, "Fiiq-fifiq-fiifiq!" Gingile inta istaagay, oo shimbirki yaraa eegay ayuu aad ugu qoslay. "Waxa aad rabtaa xoogaa malab ah, ma rabtaa, saaxiib? Ha! Laakiin hawsha oo dhan aniga ayaa qabtay, aniga ayaana qaatay qaniyo oo idil. Maxaan kuula qaybsadaa malabkan la jecelyahay?" Dabadeedna wuu iska dhaqaaqay. Ngede aad ayuu u carooday! Ma ay ahayn in sidan loola dhaqmo! Lakiin wuu aargoosan doonaa!

...

Men Gingile släckte elden och började gå hemåt samtidigt som han ignorerade fågeln. Ngede ropade argt ut: "SEG-err! SEG-err!" Gingile stannade, stirrade på den lilla fågeln och började skratta högt. "Vill du kanske ha lite honung, min vän? Ha, men jag gjorde allt arbete och fick ta emot alla sticken. Varför skulle jag dela något av den här underbara honungen med dig?" Därefter gick han sin väg. Ngede var rasande! Detta var inte rätt sätt att behandla honom på! Men han skulle nog få sin hämnd.



Asbuucyo badan kadib, maalin, markale ayuu Gingile maqlay ci'da malab sheega ee Ngede. Waxa uu xusuustay malabkii macaanaa, si xiiso leh na u dabagalay shimbirkii mar kale. Sidii uu kaynta dhinaceeda ugu horkacayey Gingile, Ngede waxuu dul istaagay geed weyn oo qodxo dallad ah leh si uu ugu nasto. "Ahh," Gingile ayaa ku fikiray. "Godka shinnida geedkan un buu ku yaal." dhaqso ba waxuu samaystay dabkii si yaraa waxa uuna bilaabay in uu fuulo, laanti yarayd ee qiieysayna ilkaha ku sita. Ngede wuu fariistay oo iska daawaday.

...

En dag, flera veckor senare, hörde Gingile honungsropet från Ngede igen. Han kom ihåg den utsökta honungen och började ivrigt följa efter fågeln igen. Efter att ha lett Gingile längs kanten av skogen stannade Ngede för att vila i ett stort akacia-träd. Ah, tänkte Gingile. Bina måste vara i det här trädet. Han tände snabbt en eld och började klättra upp med en rykande pinne mellan tänderna. Ngede satt och tittade.